



# Xeerarka Pyramid Model ee Guryaha Daryeelka carruurta ee Qoyska

## Xiriirto Kobcin iyo Falcelin leh

- D Si diiran u salaan carruurta iyo qoysaska marka ay yimaadaan (xiliga keenista iyo qaadista ilmaha) si sax ahna ugu dhawaaq magac kasta adoo raacaaya xulashada ilmaha iyo qoyska.
- D Abuur meel carruurta iyo qoysasku ku daremaan qadarin, soo dhawayn, iyo badqab.
- D Kula hadal ilmaha adoo jilbo joogsanaaya.
- D Adeegso cod leh luuq dagan, togan, oo taageero leh.
- D La hadal carruurta inta lagu jiro hawlaha joogtada ah iyo waxqabadyada.
- D Ilmaha Saqiirada ah iyo kuwa Socod Baradka, biloow oo balaari codka ilmaha oo tus ficillada.
- D Ku dhiiri geli xog isdhaafsiga gadaal iyo horey ama wada sheekaysiyada adoo ka jawaabaaya hadalka ilmaha adoo waydiinaaya su'aalo kana bixinaaya faalooyin.
- D Ku biir ciyaarta ilmaha oo taageer oo balaari isdhexgalka ay la sameeyaan ilmaha kale.
- D Hel wakhtiga fool ka foolka ah si aad ula hadasho ulana ciyaarto ilmo kasta.
- D Baro xiiseyaasha ilmo kasta oo kala sheekayso ilmaha xiiseyaashaas.
- D Faallo ka dhiibo ficillada, falalka, xiiseyaasha, iyo isdhexgallada saqiirka iyo socod baradka.
- D Ku hadal dhawr eray oo muhiim ah oo aad ku dhahayso luuqada hooyo ee ilmaha marka luuqada ilmuhu ay ka duwan tahay luuqada adeeg bixiyahooda.
- D Wax ka waydii qoysaska farsamooyinka, caadooyinka, iyo dhaqannada muhiimka u ah iyo haddii ay hayaan codsiyo la xiriira daryeelka ilmahooda.
- D Ku boori qoysaska inay kula wadaagaan isbadelo kasta oo ku dhaca hawlaha joogtada ah ama xaaladaha ilmaha.
- D Sii dareen wanaagsan carruurta marka ay samaynayaan habdhaqan wanaagsan.
- D Adeegso falcelinta qeexitaanka ah ee wanaagsan si aad fikir uga dhiibato xirfadaha, habdhaqanka, iyo waxqabadyada ilmaha.
- D Mar kasta si wanaagsan ula hadal (tusaale ah, la wadaagista awoodaha iyo dabaaldegyada) qoysaska si aad uga waranto ilmahooda dhammaadka maalinta.



**Qoraallada, Fikradaha ama Ra'iyada:**

---

---

## Bii'ooyinka Taageerada Tayada Sare leh

### Naqshadee Bii'ada Goobta

- D Si cad u qeex dhinacyada hawlaha maalin kasta iyo xarumaha waxbarashada.
- D Diyaari bii'ada si ay u noqoto mid ku habboon in ilmaha da'aha kaladuwan isku dhex galaan.
- D Ilmaha Saqiirada ah ee kayar 12 bilood, abuur goob furan oo badqab ah oo calool-calool loogu seexsho.
- D Sii ilmaha agabka xarun kasta oo waxbarasho kuwaasoo buuxinaaya heerarka kobaca ee dhammaan carruurta.
- D Adeegso xiiseyaasha iyo tallooyinka ilmaha, oo lagu daray tixgelinnada qoyska iyo dhaqanka, marka aad go'aaminayso waxa aad ku darayso xarunta waxbarashada.

### Jadwallada iyo hawlaha joogtada ah

- D Abuur jadwallada iyo hawlaha joogtada ah si aad boos u siiso waxqabadyada kaladuwan (tusaale ahaan, xiliga hurdada, qadada) ilmaha da'aha kaladuwan.
- D Ku casuun qoysaska inay kula wadaagaan hawlaha joogtada ah iyo jadwallada ay ku isticmaalaan guriga gaar ahaana kuwa khuseeya quudinta iyo jiiifka ilmaha dhashay iyo socod baradka.
- D Naqshadee jadwalka iyo hawlaha joogtada ah si loogu daro baaqiga isku dheelitirka waxqabadyada adeeg bixiyuhu hago iyo kuwa ilmuhu hago ayadoo wakhti dheeri ah la siinaayo waxqabadyada ilmuhu hagaayo.
- D Sii ilmaha socod baradka waawayn iyo ilmaha dugsiga barbaarinta jadwal muuqda kaasoo lagu soo dhajiyay meel ilmuhu ay arki karaan ayna akhriin karaan.
- D Bar carruurta jadwallada iyo hawlaha joogtada ah adoo adeegsanaaya noocyada kaladuwan ee agabka si loo buuxsho baahiyaha ilmaha da'aha kaladuwan.  
Tusaale ahaan, ilmaha saqiirada ah iyo kuwa socod baradka ah, ayaa sheega jadwalka waxa dhici doona (tusaale, wakhtiga cuntada fudud) oo tus sheey la xiriira jadwalka (tusaale, baaquliga cuntada fudud, biib).
- D Dhaqan gelin jadwallada iyo hawlaha joogtada ah si isbadel leh oo joogto ah.
- D Sharaxaad sii ilmaha marka isbadello lagu sameeyo jadwallada iyo hawlaha joogtada ah ay qasab tahay.
- D Ku casuun qoysaska inay kula wadaagaan xog ku saabsan jadwalooda iyo hawlaha joogtada ah ee guriga iyo himilooyinka iyo xeerarka qoyska.

### Himilooyinka iyo Xeerarka

- D Aqoonso 2-5 himilooyinka habdhaqanka (tusaale, "Waxaan nahay dad naxariis badan", "Waxaan haysanaa badqab") dadka waawayn iyo carruurta.
- D Ku soo dhaji himilooyinka oo leh sawiro si aad ula wadaagto qoysaska.
- D Tixraac himilooyinka dhamaan maalinta.
- D Nashaadaadka ama goobaha looga baahan yahay xeerarka, aqoonso dhawr xeer (labo ilaa shan) kuwaasoo si togan loo sheegay, la xiriira himilooyinka, lana baro carruurta (tusaale, "Adeegso cagta lagu socdo").
- D Ku soo dhaji xeerarka (ayadoo xeer walba sawir wato) meel lagula akhriin karo carruurta, carruurtuna ay arki karaan dhammaan inta waxqabadka lagu jiro.
- D Socod baradka waawayn iyo ilmaha dugsiga barbaarinta gaaray, bar xeerarka adoo adeegsanaaya xeeladaha kaladuwan iyo tusmayn si aad wax u barto ilmaha da'aha kaladuwan.
- D Adeegso fikir dhiibashada qeexitaanka wanaagsan oo aad siiso ilmaha marka carruurta ay muujiyaan himilooyinka ama ay ku dhaqmaan xeerarka.

### Sii Tilmaamo Cad oo Wax Ku Ool ah

- D U sheeg tilmaamaha si wanaagsan adoo ilmaha u sheegaaya waxa ay samaynaayan badelka waxa aysan samaynayn.
- D U sheeg tilmaamaha si dagan marka aad u dhowdahay ilmaha.

- D Adeegso xeelado dheeraad ah marka aad siinayso tilmaamaha (tusaale ahaan, tusmaynta, sawirada, tusaaleyaasha sheeyga) carruurta u baahan taageerada dheeriga ah.

### **Kalaguurada**

- D Adeegso xeeladaha kaladuwan si aad u barto tallaabooyinka kalaguurka ku saleysan baahiyaha kobaca ee ilmaha.
- D Sii digniinta kooxda oo dhan kahor inta aysan kala wareegin.
- D Adeegso xeeladaha kaladuwan ee kala guurka si aad uga caawiso dhammaan carruurta inay ka qaybgalaan kalaguurka.
- D Sii fikir dhiibasho wanaagsan oo qeexitaan ah dhammaan carruurta marka kalaguurku uu haboon yahay.

### **Hormarinta Wada Shaqeynta**

- D Sii waxqabadyo tixgelinaaya dhaqanka, xiiseyaasha, heerka kobaca, iyo da'da ilmaha.
- D Aqoonso xirfadaha iyo xeeladaha waxbarista ee dhaqan ahaan habboon oo xaqiijinaaya waafaqsana heerka kobaca ilmaha ee dhammaan waxqabadyada.
- D Sii fursado dhammaan caruurta uga qaybgalaan shaqooyinka.
- D La soco wada shaqeynta carruurta oo ka badel waxqabadka marka caruurta ay ka xiiso dhacaan shaqada.
- D Samee dhaqan gelin iyo isbadello si aad u xaqiijiso in dhammaan carruurta ay door uga qaadan karaan qaab macno leh dhammaan shaqooyinka.
- D Sii fikir dhiibasho wanaagsan oo qeexitaan ah carruurta marka ay ku dhagaysanayaan.
- D Sii dookhyo inta ay shaqada hayaan si aad u kobciso una joogtayso foognaantooda.

**Qoraallada, Fikradaha ama Ra'iyada:**

---

---

---

---

## **Yoolalka xirfadaha Bulsho-dareen**

### **Xirfadaha Saaxiibtinimada**

- D Bar xirfadaha saaxiibtinimada (tusaale ahaan, wadaagista, moogaalaysiga, wada shaqeynta) inta lagu jiro shaqooyinka la qorsheeyay iyo ciyaarta.
- D Sii isdhexgallada wanaagsan ee ilmaha isku faca ah qaabab ku habboon kobac ahaan dhammaan da'aha kaladuwan ee ilmaha.
- D Ku boori kaaliyaasha facood ah ama saaxiibada (tusaale, inay gacamaha isqabsadaan inta lagu jiro kala-guurka, saaxiibka nadaafada).
- D Dooro, nidaami, oo adeegso hawlaha ku haboon da'da ee kor u qaadaaya isdhexgallada ilmaha isku faca ah (xiisaha badan, cusub, dhaqan ahaan macno badan).
- D La joog inta lagu jiro isdhexgalka ilmaha isku faca ah si aad u xiiso amaan, kalsooni, dhiiri gelin, iyo tilmaan.
- D Ka dhiibo fikir wanaagsan oo qeexid ah si kor loogu qaado loona joogteeyo isdhexgallada bulshada.

### **Aqoonta Shucuurta**

- D Sii fursadaha waxbarashada si ay u aqoonsadaan, u calaamadeeyaan, una maareeyaan shucuuraha ayagoo adeegsanaaya mjuuqaallo iyo buugaag.
- D Bar xeeladaha ku habboon kobaca si ay isku dejiyaan marka ay xanaaqsan, faraxsan yihiin, ama careysan yihiin.

- D Ka jawaab muujinta dareennada ee carruurta adoo xaqiijinaaya dareenadooda (tusaale ahaan, Waxaan u jeedaa inaad ku faraxsan tahay inaad banaanka aado.", "Waa wax laga xumaado marka aad ku qasban tahay inaad sugto si aad ugu ciyaarto kubada binkiga ah.").
- D U muuji dhimrin iyo aqbalaad dareennada carruurta adoo adoo ku xaqiijinaaya dareenka muujinta fahanka ("Waxaan u malaynayaa inaad murugsan tahay sabab la xiriirta in aabahaa baxay uuna shaqada aado.") aadna ka caawiso ilmaha inay maareeyaan dareenadooda xoogan ("Ma dooneysaa inaad dhabtayda ku fariisato ilaa aad ka doonayso inaad ciyaarto?", "Haddii aad dooneyso inaad joogto aaga nasiinada ilaa aad ciyaar diyaar u noqonayso, waa CAADI:).
- D Tus sida loo magacaabo dareennada (tusaale, Adeeg Bixiyaha ayaa dhahaaya, "Waxaan dareemayaa inaan ku murugooday in aanan furi karin qasacaan riinJiga").
- D Ka caawi carruurta inay aqoonsadaan tusmooyinka kicinta shucuurta si iskood ah.
- D Ku hag ilmaha adeegsiga xeeladaha isdejinta marka ay dareemaan xanaaq ama caro.
- D Tixgeli dhaqannada caadada marka aad tusmaynayso aadna barayso shucuurta.
- D Ka bixi foolo wanaagsan oo qeexan marka ilmuhu ay u muujiyaan shucuurtooda qaabab habboon.

### **Xalinta Cilada**

- D Abuur fursadaha ku habboon kobaca si loogu tababaro xal u helida dhibaata ayadoo lagu saleynaayo baahiyaha ilmo kasta.
- D Sii wakhti ilmuhu cilada ku xaliyaan.
- D Bar ilmaha inay magcaabaan ayna adeegsadaan xalalka kaladuwan.
- D Adeegso xalalka nolosha rasmiga ah si ay ugu tababartaan xalinta dhibaata, ayna ku jirto qeexida dhibaata iyo calaamadeynta shucuurta.
- D Ka taageer carruurta inay adeegsadaan hanaanka xalinta caqabada inta lagu jiro isku dhaca ilmaha isku faca ah.
- D Ka dhiibo fikir wanaagsan oo qeexid ah carruurta adoo adeegsanaaya xirfadaha dhibaata.

### **Ka jawaabida Dabeecadaha Qalafsan**

- D Ka jawaab habdhaqanka qalafsan adoo adeegsanaaya xeeladaha dagan, taageerada leh, oo kobac ahaan ku habboon.
- D Si degdeg ah uga jawaab saqiirada iyo socod baradka ee walwalsan oo adeegso xeelado taageero leh si aad u dejiso ama uga caawiso inay isdejiyaan.
- D Xaqiiji dareennada carruurta kadibna taageer ilmaha inuu adeegsado habdhaqanka bulsho ee wanaagsan (tusaale, u sheeg ilmaha waxa uu samayn karo si uu u buuxsho baahidiisa).
- D U leexi ilmaha samaynaaya habdhaqanka qalafsan inay sameeyaan habdhaqanno wanaagsan ama xirfado (tusaale, "Waxaad ka qaadatay xirmooyinka Kara waayo waxaad doonaysaa inaad adna ciyaarto. Iskuday inaad Kara ka codsato inay xirmooyinka qaar ku siiso.").
- D Ka taageer ilmaha inay magacaabaan shucuurtooda.
- D Taageer ilmaha si uu u adeegsado xeeladaha isdejinta.
- D Ka taageer ilmaha abuurista xalalka dhibaatooyinka hagaaya habdhaqanka qalafsan.
- D La hadal ilmaha oo sii dareen wanaagsan kadib marka ilmuhu bilaabo inuu sameeyo habdhaqanno wanaagsan.

**Qoraallada, Fikradaha ama Ra'iyada:**

---

---

---

---

## Caawimaadaha Gaarka ah

### Caawimaadaha Gaarka ah

- D Gaar yeel casharka iyo caawimaada adoo diirada saaraaya qoyska iyo mabaadii'da dhaqanka.
- D Abuur oo dhaqan geli hawsha abuurista qorshaha taageerada Habdhaqanka.
- D Kala shaqee xubnaha qoyska si loo aqoonsado xeeladaha si xal loogu helo waxbarashada shucuurta bulshanimada iyo habdhaqannada qalafsan ee joogtada ah.
- D Aqoonso adeegyada taageerada si loo abuuro qorshe ayadoo la kaashanaayo qoyska si xal loogu helo habdhaqanka joogtada ah ama loo siiyo adeegyada dheeriga ah ilmaha marka loo baahdo.
- D Kala shaqee kooxda iyo qoyska inay baxshaan adeegyada iyo taageerooyinka ilmaha kuwaasoo ah kuwo balaaran, joogto ah, oo waafaqsan mabaadii'da qoyska.
- D Adeegso xogta si aad ula socoto waxtarka qorshaha habdhaqanka.

### Qoraallada, Fikradaha ama Ra'iyada:

---

---

---

---